

# Qorshaha Dugsiga Sare & Kadib (High School & Beyond Plan)

Magaca: \_\_\_\_\_ Fasalka: (goobaab) 7,8,9,10,11,12

Dugsiga: \_\_\_\_\_ Sanadka Qalinjabinta: \_\_\_\_\_

Iyadoo la raacayo ESHB 2224, waxaa jira shuruudo cusub oo loogu talagalay Qorshaha Dugsiga Sare iyo Kadib oo bilaabmaya 2017-18 ama dhamaanba ardayda. Qorshaha Dugsiga Sare & Kadib (HSBP) wuxuu ka hadlayaa saddex su'aalood: **Yaan ahay?, Maxaan noqon karaa?, Sidee baan ku noqon karaa?** Qorshahani waa shardiga qalinjabinta oo ka caawisa ardayda oo dhan in ay ka helaan dugsiga sare oo ka fikiraan mustaqbalkooda. **Laga bilaabo fasalka 7aad ama 8aad** waxa aad dhammaystiri doontaa qiimaynta xiisaha Aqoonta oo aad sii wadi doonto horumarinta dib u eegista qorshahan ilaa fasalka 12 aad. Waxaad la shaqeyn doontaa la-taliyahaaga dugsiga, lataliye iyo/ama macalimiinta si aad u abuurto qorshahaaga shakhsi ahaaneed, oo loo yaqaan "wadiiqada shakhsiyadeed" (personalized pathway), oo dib u eegi doonaa qorshahaaga sannad kasta si aad u hagaajisid xiisaha ama qorshooyinka dugsiga sare kadib (waxa aad qorshaynayso inaad sameyso sannadka ka dambeeya qalinjabinta dugsiga sare). Hadafyadaada dugsiga sare waxaa ka mid noqon kara kulliyado afar sano ah ama jaamacado, kulliyado bulsho ama farsamo oo laba sano ah, barnaamijyada tababarka, barnaamijyada shahaadooyinka shaqada, tababarka millatari, ama tababarka shaqada.

## Waxyaabaha loo baahan yahay ee Dugsiga Sare & Kadib

1. Aqoonsigaaga **yoolalka shaqada** adiga oo isticmaalaya **qiimaynta xiisaha xirfadaha**.
2. Aqoonsigaaga **yoolalka waxbarashada**.
3. **Qorshe koorso afar sano ah** oo leh **wadiiqada shakhsiyadeed** kaas oo buuxiya shuruudaha qalinjabinta isla markaana la jaanqaadaya shaqadaada iyo himilooyinkaaga waxbarasho.
4. Dhammaadka darajada 12aad, qoraal **hadda ah oo ah liiska hawlaha**.
5. Haddii aadan la kulmin heerka qiimeynta gobolkaada, qorshahan **waa in ay kujiraan waxqabadyada iyo taagyeerada tacliinta, koorasyo dheeraad ah, ama labadaba** taas oo kuu sahlaya inaad buuxiso shuruudaha qalinjabinta dugsiga sare.

Dugsiga Sare & Kadib waxaa loo isticmaalaa inuu hago khibradaada dugsiga sare islamarkaana kuu diyaariyo waxbarashada dugsiga sare kadib ama tababar iyo xirfad. Qorshahani waa la cusbooneysiya sannad kasta si uu u muujiyo natiijooyinkaaga qiimeynta, dib u eegista qoraalkaaga dugsiga sare, oo aad ku qiimayso horumarka ujeedooyinka la cayimay. Qorshahaada waa la cusbooneysiin karaa hadba sida lagama maarmaanka u ah beddelida danaha, ujeedooyinka, iyo baahida.

## BILAW SI AAD U SAMAYSO SHARAXAADAADA.

| Yaan ahay? | Maxaan noqon karaa? | Sidee baan ku noqon karaa? |
|------------|---------------------|----------------------------|
|            |                     |                            |

## QORSHAHAYGA

### 1. QIIMAYNTA XIISAHA XIRFADA

Diiwaanka xiisaha xirfadda ama qiimeynta waxaa la qaadan karaa sannad kasta si aad u barato xirfadahaaga iyo hamiyadaada waxbarasho.

- ▶ isku xidhka Xirfadaha: [http://www.careerbridge.wa.gov/Survey\\_Cluster.aspx](http://www.careerbridge.wa.gov/Survey_Cluster.aspx)
- ▶ Xirfad Hal ah: <https://www.careeronestop.org/toolkit/careers/interest-assessment.aspx>
- ▶ Horumarinta CTE: Tirakoobka Xiisaha ee Goobaha Shaqada: <https://careertech.org/student-interest-survey>
- ▶ Buugga Tilmaan-bixiyaha Shaqada ee Mareykanka: <https://www.bls.gov/ooh/>

### MACLUUMAADKAYGA SHAKHSIYADEED EE KU SAABSAN:

---

---

---

### 2. HADAFYADA WAXBARASHADA

Isticmaalidda xiisahaaga xirfadeed si ay kuu hagaan, yoolalka waxbarashada ee waxa aad rabto inaad qabato kadib dugsiga sare waxa lagu ogaan karaa iyada oo la isticmaalayo linkiyadan wadiiqooyinka soo socda ee dugsiga sare kahor.

- ▶ 4-Sano Kuliyaadaha Dowlada ee gobolka WA: <http://www.wsac.wa.gov/college-admissions>
- ▶ 2-sano oo ah kuliyaadaha Bulshada ama Farsamada ee gobolka WA ah: <https://www.sbctc.edu/our-colleges/search-college-programs/default.aspx>
- ▶ Kuliyaadaha 4-Sano iyo 2-Sano (Ka baxsan Gobolka/Gaarka ah)
  - Mustaqbalka Weyn ee Guddiga Sare ee kulliyadda: <https://bigfuture.collegeboard.org/>
  - Hagaha Macluumaadka kulliyadda ee Peterson: <https://www.petersons.com/college-search.aspx#/sweeps-modal>
- ▶ Barnaamijka Waxbarashada: <http://www.k12.wa.us/careertech/ProgramsofStudy.aspx>
- ▶ Barnaamijka Shahaadada Sayniska iyo Xirfadaha: <http://www.k12.wa.us/CareerTechEd/clusters/>
- ▶ Barnaamijyada Tababarista: <http://www.lni.wa.gov/tradeslicensing/apprenticeship/>
- ▶ Barnaamijka Tababarista Waxbarashada: <http://www.k12.wa.us/careertech/pubdocs/ProgramsofStudyandApprenticeshipAlignmentGrid.pdf>
- ▶ Tababar Ciidan: <http://todaysmilitary.com/>

### HADAFYADAYDA WAXBARASHO:

(in ka badan hal ayaa loo dooran karaa):

---

---

---

## SIDEE AYAAN KU GAADHI KARAA HALKAA

### 3. QORSHEEYAHAYGA KOORSADA 4TA SANO

**Tilmaamaha:** Ku tax liiska ka hooseeya koorsooyinka aad qaadatay (ama qorshaynayso inaad qaadato) sanad walba dugsiga sare. Qor oo tixgeli shuruudaha qalinjabinta ee gobolka/gobolka iyo shuruudaha gelitaanka dugsiga sare ee kuliyaddaha.

| MAWDUUCA GOOBTA  | GR 9 | GR 10 | GR 11 | GR 12 |
|--|------|-------|-------|-------|
| <b>Ingiriisi</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____  |      |       |       |       |
| <b>Xisaab</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____   |      |       |       |       |
| <b>Saynis</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____   |      |       |       |       |
| <b>Daraasaadka Bulshada</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____                                     |      |       |       |       |
| <b>Caafimaadka iyo Jimicsiga</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____                                |      |       |       |       |
| <b>*Farshaxanka ama PPR (warqad ku qoran warqad shaqo)</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____      |      |       |       |       |
| <b>*Luuqadda Aduunka ama PPR (warqad ku qoran warqad shaqo)</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____ |      |       |       |       |
| <b>Farsamada Xirfadaha - CTE</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____                                |      |       |       |       |
| <b>Xulashada Guud</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____<br>Shuruudaha Oggolaanshaha _____   |      |       |       |       |
| <b>WADARTA DARAJADA</b><br>Shuruudaha Qalinjabinta _____   |      |       |       |       |

Shuruudaha way kala duwanaan karaan. Fadlan ogow:

- Shuruudaha Qalinjabinta Degaanka: Fadlan tixraac siyaasadda degmada ee shuruudaha maxalliga ah (oo laga yaabo inay ka badan tahay shuruudaha gobolka)
- Shuruudaha Qalinjabinta Gobolka: OSP [www.k12.wa.gov](http://www.k12.wa.gov) ama Guddiga Waxbarashada ee Gobolka [www.sbe.wa.gov](http://www.sbe.wa.gov)
- Bamaamijka Waxbarashada & Shuruudaha Oggolaanshaha: Tixraac shuruudaha oggolaanshaha ee hay'adaha gaarka ah ama Guddiga Gaadhista Ardayda Washington (Washington Student Achievement Council) (<http://www.wsac.wa.gov/>)

PPR = Shardiiga Wadiiqada Shakhsiyadeed ee ku salaysan Qorshaha Dugsiga Sare & Kadib ee Fasalka 2019 iyo Kadib

## WARAAQDA SHURUUDAHA WADIIQADEEYDA SHAKHSIYADEED (PPR)

(Fasalka 2019 iyo Kadib)

Waxaa jira wadarta 7 koorso oo ka baxsan lakabka loo baahan yahay 17 ee 24 ka dhibcood ee aad u isticmaali kartid qorsheynta Wadiiqada shakhsiyadeed.

### Qeexidda Wadiiqada Shakhsiyadeed

- ▶ Qeybo ka mid ah koorsooyinka, adiga oo doortay, oo kuu diyaarinaya inaad buuxiso shuruudaha qalinjabinta iyo xirfadaha gaarka ah ee dugsiya sare ama ujeedooyinka waxbarashada.
- ▶ La abuuray iskaashi ka dhaxeeya adiga, waalidka/mas'uulka, iyo lataliyaha dugsiya, lataliyaha, ama macallinka.
- ▶ \*1 Kale oo Farshaxan iyo 2 koorso Luqada oo Caalami ah Dheeraad ah ayaa looga baahan yahay, haddii aan lagu beddelin koorsooyinka "Wadiiqada Shakhsiyadeed" ee aad dooratid qorshahaaga koorlada 4-sano ee ku saleysan danahaada iyo hadafyada waxbarasho.
- ▶ Kuwani waa 3-doorashooyin oo ay weheliyaan 4 xulasho iyo 17 maadooyinka muhiimka ah waxay dhammeystiran 24 ka dhibcood ee loo baahan yahay shahaadada xirfadeed ee xirfadda-iyo kulliyadda.

1. \*Koorsooyinka Wadiiqadayda Shakhsiyadeed, oo ku salaysan danaha shaqadayda iyo himilooyinka waxbarashada, waxaan qorsheynayaa inaan qaato koorsooyinka si aan u heli karo shuruudaha qalinjabinta: Wixii 2 Farshaxan Fiican **ama** 1 Farshaxan Fiican (hal Farshaxan Fiican waxaa looga baahan yahay inuu qalinjabiyoo) Waxaan qorsheynayaa inaan qaato \_\_\_\_\_.

2 Luqadoodka aduunka **ama** Luuqadna. Ayaan qorsheeyay inaan qaato labadan koorso \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_.

2. Sidee xiisaha shaqadayda ugu xidhan tahay koorsooyinka aan qaadanayo ama qorsheynayo inaan qaato?

---

---

---

3. Sidee koorsooyinka aan u qaato ama u qorsheynayaa inaan ku xidho wadiiqadeyda mustaqbalka shaqada ama kulliyadda weyn?

---

---

---

4. Maxay yihiin tallaabooyinka aan u baahannahay inaan qaato si aan u gaadho qorshahayga dugsiya sare kadib?

---

---

---

5. Yaan kala shaqeynayaa ujeedooyinkeeyga, qorshaha iyo doorashooyinka koorsooyinka maxayna tahay waqtigeeyga aan go'aan ka gaadhayo qorshahayga inaan ku qalinjabiyoo waqtigii iyo rabitaanadayda dugsiya sare kadib?

---

---

---

6. Maxaa dhacaya haddii aan maskaxdayda beddelo? Yaan kala hadli doonaa dib u eegidda qorshahayga?

---

---

---

## QIIMAYNTAYDA SHARCIYADA, BULSHADA, IYO LABADA DHIBCOODA

Laga bilaabo 2017-2018 Dugsiga Sare iyo Qorshaha Kadib waa in la cusbooneysiisaa si loo muujiyo natiijooyinka qiimeynta dugsiga sare.

|  |   |
|--|---|
| <b>LOO BAAHAN YAHAY</b>  |   |
| <b>Qiimaynta Gobolka</b>   | <b>Natiijooyinka Dhibcaha/Natiijooyinka (CAA/CIA)</b> |
| <input type="checkbox"/> Qiimeynta Imtixaanka U Diyaarsanaanta                     |   |
| <input type="checkbox"/> Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA)                    |   |
| <input type="checkbox"/> Xisaab  |   |
| <input type="checkbox"/> Saynis  |   |
| <input type="checkbox"/> Imtixaanada Dhammaadka Koorsada iyo Imtixaanada Deegaanka |   |
| <input type="checkbox"/> Imtixaanada Dhammaadka Koorsada iyo Imtixaanada Deegaanka |   |
| <input type="checkbox"/> Beddelka – Cadee:   |   |
| <input type="checkbox"/> Beddelka – Cadee:   |   |
|  |   |
| <b>IKHTIYAAR</b>   |   |
| <b>Qiimaynta Diyaargarowga Shaqada iyo Kulliyadda</b>                              | <b>Dhibcahayga Wadajirka ah</b>                       |
| <input type="checkbox"/> PSAT Akhriska _____ Xisaab _____                          |   |
| <input type="checkbox"/> SAT Akhriska _____ Xisaab _____ Qorista _____             |   |
| <input type="checkbox"/> ACT Akhriska _____ Xisaab _____ Qorista _____             |   |
| Daraasaadka Bulshada _____   |   |
| <input type="checkbox"/> ASVAB   |   |
| <input type="checkbox"/> Imtixaanada Meelaynta kulliyadda                          |   |
| <input type="checkbox"/> Wax kale _____  |   |
| <input type="checkbox"/> Wax kale _____  |   |
| <b>Dhibcaha Koorsooyinka kulliyadda</b>  | <b>Fasalkayga</b>                                     |
| <input type="checkbox"/> Ingiriisi   |   |
| <input type="checkbox"/> Xisaab  |   |
| <b>Imtixaanada Koorsada Labada dhibcod ee dhibcaha Kulliyadda</b>                  | <b>Dhibcahayga, Darajada iyo/ama Fasalka</b>          |
| <input type="checkbox"/> Meelaynta Sare (Advanced Placement, AP)                   |   |
| <input type="checkbox"/> International Baccalaureate (IB)                          |   |
| <input type="checkbox"/> Cambridge International (CI)                              |   |
| <b>Koorsooyinka Lacagta ah ee Dhibcaha kulliyadda</b>                              |   |
| <input type="checkbox"/> Bilowga (Running Start)                                   |   |
| <input type="checkbox"/> Kulliyadda Dugsiga Sare (College in the High School)      |   |
| <input type="checkbox"/> Tech Prep   |   |
| <input type="checkbox"/> WAX KALE  |   |

## DHIBCAHAYGA IYO DIB U EEGISTA HORUMARKAYGA

Waxa lagaaga baahan yahay inaad dib u eegto buundadaada/darajadaada iyo horumarkaaga ahdaaf cayiman, aanad samayso dib ugu noqosho sida ay lagama maarmaanka u tahay siloo beddelo xiisaha, hadafyada, iyo baahiyaha, iyada oo bilaabmaysa 2017-2018.

Dib u eegista Dhibcaha iyo Horumarka ee La Taliyahayga Dugsiga/La Taliye Taariikhda: \_\_\_\_\_

## 4. QORAALKA AMA LIISKA HAWLAHA

Qorshaha Dugsiga Sare & Kadib waa inuu ku jiraa qoraal dhamaystiran dhammaadka fasalka 12aad. **Qoraalka iyo liiska hawluhu** waa hab fiican oo dadka ku bari karto naftaada. Caadi ahaan waxaad u baahan doontaa hal mar haddii aad codsanayso shaqo, tababar, ama deeq waxbarasho, midna waxaa laga yaabaa in loo baahdo codsiga kulliyadda. Qoraalka ama liiska hawlaha ayaa lagu soo koobaya cidda aad ku jirto, laakiin aan ku xaddidneyn waayo-aragnimadaada, waxa aad sameyn kartid, iyo xirfadahaaga gaarka ah, kartida, iyo hogaaminta iyo/ama awoodda ciyaaraha fudud.

### SAMAYNTA QORAAL AMA LIISKA HAWLAHA

Qoraalka iyo liiska hawlaha oo fiican waxa ay leeyihiin afar qaybood:

- ▶ **Macluumaadka Xidhiidhka.** Halka sare ee qoraalkaaga ama liiska hawlahaada waa inay kujiraan macluumaadka xidhiidhka. Macluumaadkan badanaa waxa lagu qoraa dhexda bogga. Waxa inaad ku samayso magacaaga cabbir wayn ama madow markaa oo si fiican loo arkayo. ka dhig qoraalkaaga ama liiska hawlahaada mid si fudud loo akhriin karo adiga oo isticmaalaya meelo banaan oo badan ama cabbir ka weyn 11. Xaqiiji in fartaadu ay tahay sans serif si si fiican loogu akhriyo. Macluumaadkaaga xidhiidhka waa in ay ku jiraan:
  - Magaca
  - Cinwaanka (ikhtiyaar)
  - Teleefoon lambarka
  - Cinwaanka iimaylka
- ▶ **Ujeeddo.** Maxaad u rabtaa shaqo? Maxaad u doonaysaa inaad tagto machad jaamacadeed ama lagu siiyo deeq waxbarasho? Ujeedadaadu waa hadal kooban, caadi ahaan hal ama laba weedho.
- ▶ **Xirfadaha iyo Awoodaha.** Qaybtaan ku qor xirfadahaaga, xiisahaaga iyo awoodahaaga. Xitaa haddii aadan waligaa horay shaqo u qabin, waxaad leedahay xirfado. Maxay yihiin? Waxaa laga yaabaa inaad haysatid ardayda yaryar ama aad taqaanid sida loo horumariyo bogga internetka. Waxa laga yaabaa inaad u tartanto xafiiska dugsiga ah ama xaflad lasoo nimaadimayay oo dugsiga. Marka aad qorayso xirfadahaaga iyo awoodahaaga:
  - Isticmaal qodob fudud intii aad ka isticmaali lahayd weedh dhammaystiran. *(Tusaale ahaan: Aasaasay lacag ururin dhibanayaal duufaano)*
  - Isticmaal Erayada ficilka. *(Tusaalayaal: Hogaamin, nimaadin, maamulid, habayn, horumarin)*
  - Isticmaal xirfadaha jilicdasaan si aad u sharaxdo waxyaalaha aad ku xoogan tahay *(Tusaalayaal: Xirfadaha xidhiidhka, saaxiibtinimada, joogto ah, dhismaha wada shaqayn, is-waafajin, Xirfadaha xallinta dhibaatooyinka, mas'uul ah, la isku hallayn karo)*
  - Isticmaal nambarda iyo boqolayda si aad u qiyaastid guulahaaga. *(Tusaale ahaan: Aasaasid lacag ururin loo sameeyay dhibanayaashii dhulgariirka taasi oo gaadhay \$5,000)*
  - Ka hadal xirfadahaaga farsamada ama kombiyuutarka. *(Ku fiican Microsoft Office iyo Adobe Flash)*
- ▶ **Khibrad.** Qaybtaan, ku qor shaqooyinka aad mushaharka ku qaadan jirtay, hawlaha iskaa wax u qabso, iyo waxqabadyada ka baxsan hawlaha, gaar ahaan haddii hawlahaasi ay muujinayaan hoggaankaaga, xirfadahaaga iyo/ama naftaada. U qeex mid walba si kooban. Waxaad sidoo kale qori kartaa abaalmarin ama aqoonsi kale oo aad heshay.

## QORAALKA AMA LIISKA HAWLAHA

Waxaad isticmaali kartaa hagahan si aad u qaadato qoraallo iyo raadin macluumaad kaas oo loo isticmaali karo qoraalkaaga ama liiska hawlahaada.

**Macluumaadka Xidhiidhka:** (Hubi inaad qortid lambarka lagaa heli karo iyo in iimaylkaagu yahay mid rasmi ah.)

---

---

---

---

**Ujeedo:** (Haddii aad shaqo dalbanayso, sharax sababta aad u rabto shaqada, iyo waxa aad rajeyneyso inaad barato. Haddii aanad doonayn inaad xarayso shaqadan hadda, qor inaad rabto inaad xirfadahaaga u dhigto inaad u shaqeyso bulshada. Haddii aad isticmaasho qoraalkaaga hawlaha si aad u qorto bayaan shakhsi ah oo ku saabsan codsiga kuuliyadda ama deeqda waxbarasho, faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan doorkaaga hogaaminta, ujeedooyinka, ama duruufaha gaarka ah ayaa loo baahan yahay):

---

---

---

---

**Xirfadaha iyo Awoodaha:** (Xusuusnow, qodobada gaaban adigoo isticmaalaya erayada ficilka. Waa inaad sidoo kale qortaa koorsooyinka Xirfadaha iyo Farsamada, shahaadooyinka, dhibcaha kuliyadeed, iyo shahaadooyinka kahor-barashada.)

---

---

---

---

**Khibrad:** (Muuji jagooyinkaaga/mas'uuliyadahaaga, mas'uuliyadaha ugu muhiimsan ama waxyaabaha aad ku sameysay mowqifka, shaqada ama khibrada iskaa wax u qabso, iyo taxanahaaga ku qoran dugsi kasta ama kooxo ku salaysan jaaliyad aad ku biirtay)

---

---

---

---

**Hawlaha/Ciyaaraha, Doorka Hoggaanka, Kartida, Abaalmarinta, Adeega Bulshada:** (Sharaxaad ka bixi jagooyinkaaga iyo qor waxyaalaha aad ka fulisay kooxaha aad ku biirtay.)

---

---

---

---

## 5. SHURUUDAHA DHEERAADKA EE ARDAYDA KUWAASI OO AAN LA KULMIN HEERKA QIIMAYNTA GOBOLKA KAHOR FASALKA 11AAD

Waxqabadyada, taageerooyinka, ama koorsooyinka gaarka ah ee loogu talagalay in lagaa caawiyo buuxinta heerka qalinjabinta dugsiga sare iyo shuruudaha waa inay noqdaan kuwo adag oo si joogta ah ula socda himilooyinka waxbarashada iyo shaqada HSBP iyo **laga yaabaa** inay kujiraan:

- |   |   |
|---|---|
| <ul style="list-style-type: none"> <li><input type="checkbox"/> Doorbidyada kala doorashada koorsada ama isbeddelada muddaynta</li> <li><input type="checkbox"/> Talo-siinta qorshaha “dhabbaha ku taagan” wakhtiga qalinjabinta dhacayso</li> <li><input type="checkbox"/> Waxqabadyada tacliimeed oo ay la socota baaritaanka horumarinta joogtada ah</li> <li><input type="checkbox"/> La-talinta dugsiga isku-xidhka taageerada bulshada/dareenka</li> <li><input type="checkbox"/> Koorsada Labada dhibcood (AP, IB, CI, College in the HS, Running Start, Tech Prep)</li> <li><input type="checkbox"/> Koorsada u dhiganta xirfadaha iyo farsamada</li> <li><input type="checkbox"/> Koorsada ku meel gaadh ah (Isku xidhka Xisaabta iyo/ama Ingiriisiga Kulliyadda)</li> </ul> | <ul style="list-style-type: none"> <li><input type="checkbox"/> Degmo dugsiiyeedka degmada ayaa go'aamiyay koorsooyin qiimayn u qalma</li> <li><input type="checkbox"/> Koorasyada dib u soo kabashada</li> <li><input type="checkbox"/> Koorasyo qalinjebin ah</li> <li><input type="checkbox"/> Umeerin/Umeerin</li> <li><input type="checkbox"/> Shirarka Waalidka/Masuulka/Macallinka/La-taliyaha</li> <li><input type="checkbox"/> Soo Xaadiridda</li> <li><input type="checkbox"/> Fursadda maalinta dugsiga lagu sii nagaado</li> <li><input type="checkbox"/> Dugsiga xagaaga</li> <li><input type="checkbox"/> Wax kale _____</li> <li><input type="checkbox"/> Wax kale _____</li> <li><input type="checkbox"/> Wax kale _____</li> </ul> |
|---|---|

### WAX QABADKAYGA:

| Istaraatiijiyada la doortay: | Jadwalka: | Natiijada: |
|------------------------------|-----------|------------|
|                              |           |            |

### TAAGEERADAYDA AQQONTA:

| Istaraatiijiyada la doortay: | Jadwalka: | Natiijada: |
|------------------------------|-----------|------------|
|                              |           |            |



## SHURUUDAHA DHEERAADKA AH EE ARDAYDA FASALKA 8AAD

### ▶ ARDAYDA FASALKA 8AAD KUWAASI OO AAN HELIN HEERKA 3 EE QIIMAYNTA XISAABTA EE GOBOLKA EE DUGSIGA DHEXE

Imtixaanka qiimeynta gobolka xisaabta ee dugsiga dhexe dhibcaha ka hooseeya Heerka 3 waa inuu qaataa koorsada xisaabta fasalada 9aad iyo 10aad (Koorasadani waxaa ku jiri kara maaddooyinka shaqada iyo farsamooyinka xisaabta ee xisaabta).

### ▶ ARDAYDA FASALKA 8AAD KUWAASI OO AAN HELIN QIIMAYNTA GOBOLKA EE HEERKA 3AAD

Qorshaha Waxbarashada Ardayga oo Dhammaystiran kahor inta aanu galin fasalka 9aad:  
(<http://www.k12.wa.us/careertech/ProgramsofStudy.aspx>)

Saxeexa Waalidka/Wakiilka: (ikhtiyaar) \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_

ESHB 2224 (2017): "Dugsi Degmeedyada waxa lagu dhiirigelinayaa inay waalidiinta iyo wakiilada ku lug yeeshaan habka horumarinta iyo wax ka beddelka Dugsiga Sare iyo Qorshaha Kadib."

E2SSB 6552 (2014): "Kujirida darajada saddexaad iyo xisaabta iyo kujirida darada saddexaad ee saynisku waa in loo dooraa ardayga iyada oo lagu salaynayo xiisaha ardayga iyo qorshaha dugsiga sare iyo kadib iyada oo lala heshiinayo waalidka ama wakiilka ardayga ama iyada oo lala heshiinayo la taliyaha dugsiga ama maamulaha."

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO KU SAABSAN QIIMAYNTA

### XAALADAHA QIIMAYNTA AH EE GOBOLKU WAXAY RACFAAN KA QAADATAY LOOGU FASALKII 2014 – 2018

<http://www.k12.wa.us/Assessment/GraduationAlternatives/ExpeditedAppeals.aspx>

### QIIMEYNTA GOBOLKA AH EE LOOGU TALAGALAY SHAQADA AQOONSIGA (CAA)

<http://www.k12.wa.us/assessment/GraduationAlternatives/Options.aspx>

Uruurinta Caddaynta (COE) ayaa la tirtiray laga bilaabo 2017-18.

<http://www.k12.wa.us/assessment/GraduationAlternatives/default.aspx>

- |   |  |
|---|--|
| <ul style="list-style-type: none"><li>▶ Dhibcaha SAT/ACT ama Dhibcaha Luuqadda Ingiriisiga (ELA)</li><li>▶ Isbarbardhigga GPA (waa inuu haystaa 3.2 GPA)</li><li>▶ Meelaynta Saraysa (AP) ama Dhibcaha Imtixaanka Caalamiga ah (IB)</li><li>▶ Koorsooyinka labada dhibcooda</li></ul> | <ul style="list-style-type: none"><li>▶ Wixii 2018-19 Degmo dugsiiyeedka degmada ayaa go'aamiyay koorsada qiimaynta u qalma sida ku qeexan Qorshaha Dugsiga Sare &amp; Kadib (CTE ee isku dhigma ELA ama Xisaab ayaa lagu dari karaa)</li><li>▶ Koorasyada Ku Meel Gaadhka ah ee 2018-19</li></ul> |
|---|--|

OGEYSIIS